

Ku soo dhowow waxbarasho-horaadka-macluumaad mas'uuliyiinta loogu talagalay oo ku saabsan qabanqaabada waxbarasho-horaadka

Ilmahaagu waxaa uu deyrta dambe bilaabayaa waxbarasho-horaadka!

Waxbarasho-horaadku waxaa uu horumariyaa oo uu kabaa korriinka ilmaha, kobiciisa iyo waxbarashadiisa. Waxaa uu fududeeyaa in uu ilmuhu waxbarasho-horaadka kaddib u sii gudbo iskoolka. Wadada waxbarashada cunuggu waxay ka baxeysaa barbaarin-horaadka waxayna iyadoo sii mareysaa waxbarasho-horaadka u gudbaysaa waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarasho-horaadka waxaa fiiri gaar ah loogu yeeshaa ilmaha baahiyadiisa, qaabdhacanka iyo qaabka uu wax u barto ee gaarka u ah shaqsiyaddiisa. Ciyaarta, dhaqdhaqaaqa iyo baadhista wadajirka ay ku yihiin carruurta iyo dadka waawayn waxaa weeyaan qaabka waxbarista loogu fuliyo ee wax lagu barto marka la dhiganayo waxbarasho-horaadka.

Waxbarasho-horaadku waa lacag la'aan waxaana inta badan la bixiyaa afar saacadoo maalintii inta lagu jiro wakhtiyada ay dugsiyadu shaqeeyaan. Barbaarin-horaadku waxay u sii soconayaa qaab dhammaystir u ah waxbarasho-horaadka iyadoo waafaqsan baahida qoyska. Cunug kasta waa in uu ka qeybqaataa waxbarasho-horaadka sannad kahor inta ay uusan bilaaban waajibka waxbarashadu. Mas'uuliyadda ka qeybqaadashada cunuggu waxay saaran tahay mas'uulka cunugga.

Macluumaad ku saabsan goobta waxbarasho horaadka oo lagu helayo farriin taleefanka ah

Goobta waxbarasho-horaadka ilmaha looga qorayo waa nawaaxiga ardayda lagu qaabilo ee ardaygu uu dagaanka ku yahay. Deegaankaaga xanaanooyinka ku yaalla ee bixiya waxbarasho-horaadka waxaa aad ka arki kartaa ciwaanka palvelukartta.hel.fi.

Macluumaadka ku saabsan booska waxbarasho-horaadka waxaa laguugu soo dirayaa farriin taleefankaaga 7.1.2021. Farriinta waxaa lagu soo dirayaa lambarka loo sheegay xanaanada ee ilmaha lagala xidhiidhayo. Farriinta waxaa loo dirayaa oo kaliya mid kamid ah waalidiinta. Fadlan, hubi in xanaanadu ay haysato taleefan lambar shaqaynaya! Macluumaadka ku saabsan lambarada taleefanka waxaa xanaanada lagaga ururiyay dadka foomka macluumaadka guud, waxaana isla macluumaadka foomkaas loo isticmaalayaa qabanqaabada waxbarasho-horaadka. Qoraalka diiwaanka barbaarin-horaadka: <https://www.hel.fi/static/liitteet/kanslia/rekisteriselosteet/Kasko/Kasko-EU-Varhaiskasvatuksen-asiakasrekisteri.pdf>

Sidan ayeey u shaqeysaa:

- 1) Waxaad heleysaa farriin qoraal ah, taas oo cunuggaada loogu soo jeedinayo booska waxbarasho-horaadka.
- 2) Soojeedinta waxaad ku aqbalaysaa ama ku diidaysaa qaab waafaqsan tilmaamaha ku qoran farriinta qoraalka ah.
- 3) Soo jeedinta waa la aqbalay: Wax walba waa cad yihiin! Go'aanka rasmiga ah waxaad heleysaa bisha Febraayo.

Haddii aadan qaadan booska waxbarasho-horaadka ee cunugga loo soo jeediyay, booska waad iska dhiibtay waxaadna xannaano-maalmeed kale ka codsan kartaa boos waxbarasho-

horaad. Waxbarasho-horaadka waxaa wakhtiga u dhexeeya 7.–22.1.2021 laga codsanayaa arrimo fullinta elegtroonigga ah ee (asiointi.hel.fi). Waan u ballan qaadaynaa ilmaha in uu ka helo boos waxbarasho-horraad ah oo ku yaalla nawaaxiga ardayda laga qaadanayo ee ilmuhu uu degganyahay. U wareegista soona kale waa suurtagal, haddii ay halkaas ka bannaan yihiin boosas waxbarasho-horaad.

Haddii aysan codsashada elegtroonigga ah suurtagal aheyn, foom warqad ah ayaa lagu codsan karaa, foomkaas oo xannaano-maalmeedka loo soo celinayo. Waxbarasho-horaadka xannaano-maalmeedka gaarka loo leeyahay toos ayaa xannaano-maalmeedka looga codsanayaa.

Waxbarasho-horaadka ku baxda afka Finnishka waxaa magaalada Helsinki looga qabanqaabiyaa xannaano-maalmeedyada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Ku socota ardayga dugsi-horaadka

Deyrta soo socota waxaa bilaabanaya dugsi-horaad.

Dugsi-horaadka waxaad ciyaar ahaan, jimicsi, baaritaan iyo farshaxan ahaan ku baranaysaa wax cusub. Waxaad ku baranaysaa saaxiibo cusub waxaad ka uruursanaysaa buuros buuxda oo waayo-aragnimo ah. Waxaadna sidoo kale inta sannadka lagu jiro soo qooraansan doontaa waxa ka dhacaya dugsiiga.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jadwallada qabanqaabinta waxbarasho-horaadka waxaa laga helaa bogagga shabakadda Helsinki hel.fi/preschool

Ku soo dhowow dugsi-horaadka!



Helsinki

Kasvatus ja koulutus
hel.fi/esiopetus
#HelsinkiOppii